

XEER GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER Lamb. 13 ee 29 Oktoober 1969

Joojinta Istimaalka Raadiyaha Sida Gaarka loo Istimaal

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Kadib markii la arkay Baaqa Kaacanka eek u taarikhsan 21 Oktoobar 1969.

Kadib markii la tixgelieye muhimadda sare ee ammarka qaranka.

Kadib markii la habsaday in Safarado qaarkood, hey'addo iyo shaqsiyaal ay leeyihiin shabakado war laliska radiya.

Kadib markii la arkay faqradda 2 ee qod. 32 ee Xiriirka Caalamiga ee Wargelinta (Montreux 1965).

WAXAA LA AMRAY

Qod. 1

Waxaa gebi aaahan la joojiyey in lagu isticmaalo dhulka Jamhuuriyadda Dimuqratiiga ee Somaliya, lahaanshaha, isticmaalka gaarka ee shabakadaha war laliska eek u shaqeeya hiraarka VHF, HF iyo UHF kaas oo noqon kara mid radiyaha iyo mida farta morse.

Qod. 2

Safaarada, hey'adaha gaarka loo leeyahay, iyo shaqsiyaalka haysta qalabka radiyaha war laliska waxaa la amrayaa in ay joojiyaan laga bilaabo maalinta dekreetada la fafiyey, wax allaliyo wixii adeeg an ee wargeys caalami ama dalka dhexdiisa.

Qod. 3

Iyadoo loo hoggansan yahay qod. 31 ee Axdiga Caalamiga ee Isgaarsinta, waxaa loo ballan qaaday adeega isgaarsiinta caalamiga iyo dalka dhexdiisa iyado wax caqabad ama kala jeclaan jirin.

Qod. 4

Ciddi haysato fassax ay dowladii hore siisay ee la xiriira isticmaalka gaarka ee qalabka radiyada waa in ay iska xaadiriyaan Golaha Sare ee Kacaanka ama saldhigga Booliska ee ugu dhaw si deg deg ah ugu dambeystii ilaa 5 Nofeember 1969.

Qod. 5

Dekreetadani waxay hirgeli doonta isla waqtigaan, kadib markii lagu soo daabaco oo lagu keydiyo Keyda sharciyada ee Jamhuuriyadda Dimuqratiiga ee Somaliya.

Muqdisho, 29 Oktoober 1969.

Golaha Sare ee Kacaanka

SG Mohamed Siyaad Barre

(Lamb. 14 REP)